

Deganaha Qaaliga Ahaaw,

## **Ku-lug-lahaanshaha Xeelada Deqnaansho Badqab ee Dhismahaaga**

Waxaan ku faraxsanahay inaan wadaagno daah-furida Ku-lug-lahaanshaha Xeelada Deqnaansho Badqab ee Dhismaha 2024-2026, loo abuurey si gaar ah dadka degan guriyaha dhaadheer ee jira 18 mitir ama ka badan dhirikooda, ama 7 dabaq ama ka badan, lana diiwaangashan Maareeyaha Badqabka Dhismo (Building Safety Regulator) - Maareeyaha dhismooyinka dhaadheer ee England.

Xeelada waxey dabooshaa qodob muhiim ah ee ku saabsan badqabka dhismaha oo adiga ku saameeya ka degane dhisme dheer ah, ay ku jirto:

- Macluumaad badqab dhisme noocee ayaan kula wadaagi doonaa
- Sidee iyo goorma ayaan uruurin doonaa warcelintaada ku aadan badqabka dhismaha
- Sida aan kaaga qeyb galin doono kuuna wargelin doono si ku saabsan arrimaha badqabka dhismaha.
- Go'aamada aan ku weydin doono si aad qeyb uga qaadato
- Masuuliyadahaaga degane ahaan si looga caawiyo in gurigaaga badqab laga dhigo.
- Sida loo soo gudbiyo dood badqab dhisme.

Waxaan kuu soo dirney dulmar ah xeelada buuxda. Haddii aad jeclaan lahayd inaad akhriso xeelada buuxda, waxaad ka heli kartaa onleenka [camden.gov.uk/highrisestrategy](https://www.camden.gov.uk/highrisestrategy) Taa bedelkeeda, waxaad fariin ku reebi kartaa magacaaga iyo faahfaahinta lagaala soo xiriira sanduuqa codka ee Maamulkeena Badqabka Dhismaha, waxaana kuu soo diri doonaa nuqul warqad ah. Sidookale waad nagala soo xiriiri kartaa si aad wax nooga weydiiso turjumaado ama noocyo kale.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama u baahantahay macluumaad dheeri ah oo ku saabsan xeelada, fadlan haka labalabeyn inaad nala soo xiriirtid. Si aad noogula soo xiriirtid iimeyl [buildingsafetymanager@camden.gov.uk](mailto:buildingsafetymanager@camden.gov.uk) ama noola reeb fariin magacaaga, faahfaahinta lagaala soo xiriira iyo su'aal ee sanduuqeena codka ee **0207 974 2585** waana kuu soo jawaabi doonaa.

Daacad kuu ah

Kooxda Maareynta Badqabka Dhismaha